



Waxaa la rabaa: shakhsiyaad dadaal badan, oo jecel in ay ku soo biiraan PPS iyaga oo ah caawiyayaasha macallinka

Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay raadinayaan in ay shaqaaleysiiyaan dad jecel in ay caawiyaan ardayda qabta naafanimada dhanka korriinta iyo waxbarashada si ay u noqdaan caawiyayaasha macallinka.

Marka la joogo PPS, caawiyayaasha macallinku waxay la shaqeyn doonaan macallimiinta waxbarashada gaarka iyo xirfadlayaal si ay u taageeraan waxbarasho gaar ah loo oo dejiyay, tilmaamaha hab-dhaqanka, iyo maamulida jireed ee ardayda. Sharaxaada buuxda ee shaqada iyo faahfaahinta kale waxaa laga helayaa [bogga liiska shaqada](#) ee PPS (geli 18673 meesha bannaan ee wax laga raadiyo).

Qof kasta oo daneynaya waxaa lagu martiqaadayaa wareysiga Jimce kasta inta ka hartay bisha (Janaayo 11, 18 iyo 25) kaasi oo ka dhacaya Xarunta Adeega Waxbarashada Blanchard (501 N. Dixon). Wareysiyada waxaa la qaban doonaa 9 subaxnio ilaa duhurka. Codsadayaasha balan la'aan iyaga oo iska socdo yimaada 'walk-ins' waa la soo dhaweynayaa, laakiin waxaa lagugu dhiirigelinayaa in aad [ka codsato internet-ka](#) ee soo dhejinta No. 18673 si loo dedejiyo nidaamka.

Macluumaad dheeraad ah ayaa laga helayaa [website-ka Waxbarashada gaarka ah](#). Wixii macluumaad dheeraad ah iyo taageero ah ee ku saabsan nidaamka codsiga, fadlan Kheyraadka Dadweynaha ka wac 503-916-3544.